

Xeerarka wanaag ku wada joogidda.

Halkan annagu waannu isu nugulnahay midba midka kale. Waxayna khusaysaa dhammaan haddii ay noqon lahayd dadka imaanaya iyo shaqaalahaba!

Annagu waannu ilaalinta degaanka aannu joogno iyo agabkeena. Taasna macnaheedu waxa weeyaan in aannaan anagu ku istaagaynin ama ku dul soconaynin kuraasta iyo miisaska, in aannaan barkimaha isku tuur tuurayn, in aannan muusig cod dheer shidayn oo aynaan sameecadaha qarxinayn. Haddii ay wax naga daataan waa in aannu hubinaa in wixii daatay la qallajiyay. Waana in aannaan ku dhex ordin aqalka dhexdiisa. Halkan marka aannu ku ordayno cagaha, waxaannu u baxaynaa bannaanka markaas ayaannu annagu ordaynaa. Haddii si u kas ah wax loo jabiyo, qofkii jabiyay ayay waajib ku tahay in uu soo gudo.

Kabaha ayaannu anagu iska bixinnaa meesha aan kabaha loo ogolayn.

Waxa aannu annagu iska caawinaa sidii wax loo habayn lahaa, waxaana meel isugu gubnaa alaabta aqalka taall. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in aannu ku qasbannaano in aannu kala gurno wax uu kala daadiyay qof kale. Waana taas midda halkan ka jirtaa ee ka shaqysaa.

Annagu waxaannu nahay qolo mukhaadaraadka iyo buuridaba ama tubaakada ka caaggan oo aan isticmaalin.

Haddii aad adigu dooratid in aadan raacin xeerarka noo wada yaalla, haddaba nooma imaan kartid!. Way iska caddahay in hal mar lagu siinayo digniin haddii aad hilmaantid, laakiin haddii aad ku madax adaygtid in aad waxaas sii waddid waxaa aadaysaa gurigiina. Markaasna hoggaamiyaha goobta waqtiyada firaaqada wuxuu wacaa qofka masuulka kaa ah, wuxuuna u sheegayaa sababta keentay in aad sii joogi waysid goobta waqtiyada firaaqada.

haddii aad khamri soo cabtidmoo aad dooratayna in aad moo timaadid, haddaba waxaa dhacaysa in lagaa xiraa meesha muddo dhan hal bil, isla markaasna waa iska caddahay in aannu wacayno waalidkaa.

Haddii aad adigu doonaysid in aad wax dheeraad ah ka ogaatid qaabka aannu uga shaqayno dadka na soo booqda marka ay xeerarka iyo sharciyada noo yaalla ku xad gudbaan, waxaad kala hadli kartaa shaqaalaheena, amase waxaad gashaa boggeena internetka www.gagnet.se waxaadna akhrisaan cinwaanka bogga waalidiinta hoostiisa. Halkaas waxaa ku yaalla dhammaan macluumaadka.

Dhammaan soo boqdayaasha waxaa la siinayaa kaarta xarunta. Oo bilaash ah. Waxaana idin siinaya xarunta waqtiyada firaaqada. Marka kaarka lagu siiyana waxaad saxiixaysaa in aad ogolaatay xeerarka noo yaallaa ee iska fudud laakiin muhiimka ah. Waxaad annaga na soo

booqan kartaa taniyo sannadka aad buuxinaysid 18 sano. Intaas wixii ka danbeeya waxaannu ka caawinaynaa in la helo goob ay dhallin yaradu ku madadaashaan laakiin anagu u samayn mayno.

Ku soo dhowaada